



PPS oo bilawday REAHL, oo ah qorshe lagu caawinayo ardayda qaba dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirka

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay bilawday qorshe loogu talagalay bixinta daryeel buuxa oo loogu talagalay ardayda ay dhibaataadu ka haysato isticmaalka mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirka. Qorshaha, waxaa lagaga dhawaaqay jir jaraa'd oo Khamiistii ka dhacay xafiiska degmada, ayaa yimid isaga oo jawaab u ah tirada sii kordhaysa ee ardaydeena iyo qoysaskeena ee ay saameysay dhibaataada qaranka ee opioid, iyo sidoo kale mukhaadaraadka kale iyo dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka.

Ka soo kabashada, Waxbarashada iyo Tallaabada loogu talagalay Caafimaad Ku noolaanshaha (REAHL) ayaa u shaqeyn doona in uu noqdo meel kala nidaamisa taageerada ardaydu ka hesho PPS, bulshada iyo hay'adaha degaanka.

“Tani waa dadaal ay Dugsiyada Dadweynaha Portland ay ku maareynayo hawlaha isla markaana ku bixinayso barnaamijka dhanka hortagga, daaweynta, ka soo kabashada oo loogu talagalay ardayda, waanan ku faraxsanahay dhammaan arrimahan oo dhan,” ayay sheegtay **Rita Moore**, oo ah Guddoomiyaha Guddiga Waxbarashada PPS.

Horraantii sanadkan, PPS waxay abuurtay koox shaqo oo ka jirta degmada oo dhan si loo dejiyo daryeel joogta oo lagu taageerayo ardaydeena iyo qoysaskeena ay saameynta ku yeesheen dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirka. Dadaaladu waxay keeneen qorshe shan sano ah oo leh hadaf awood u siinaya ardayda la kulanta dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirku in ay si firfircoon ugu lug yeeshaan waxbarashadooda, koritaankooda shakhsi ahaaneed, iyo guul muddadeedu dheer tahay.

Daryeelka joogtada ee REAHL wuxuu ka kooban yahay afar qaybood oo waaweyn: ka hortag, waxka qabasho, daaweyn, iyo ka soo kabasho. Qayb kasta, degmadu waxbay bixinaysaa ama qorsheyneysaa si ay adeegyo toos ah u siiso ardayda ama iyada oo adeegsanaysa iskaashiga ay leedahay hay'adaha bulshada ee degaanka.

“Aad ayaan ugu faraxsanahay qorshaha REAHL ee ka jira halkan Dugsiyada Dadweynaha Portland sababta oo ah waxay noqon doona shaqo muhiim ah, shaqo muhiim ah oo aan u isticmaali karno tusaale ahaan si aan awood u siino ardayda la kulanta dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirka isla markaana ugu caawino in ay ka gudbaan caqabadaha jira,” oo ah U.S. Rep. **Suzanne Bonamici** ayay ku sheegtay shirka jaraa'id.

PPS way shaqeynaysaa iyada oo taageero ka helaysa hay'adaha bulshada oo badan, waxayna eegi doontaa in ay ballaarisoo wada shaqeynta ay la leedahay xubnaha ka tirsan bulshada, ganacsiyada, ururada samafalka, iyo kuwa kale.

Guddoomiyaha Degaanka Multnomah **Sharon Meieran**, oo sidoo kale ah dhakhtarka qolka gargaarka degdega ah, ayaa shirka jaraa'id kaga hadashay in ay soo aragtay oo ay waayo-arag u tahay baahida loo qabo in la caawiyo dadka dhallinyarada ah.

“Ogaanshaha dhibaatooyinka isticmaalka mukhaadaraadka ee waqtiga hore iyo caafimaadka maskaxdu sida ay inta badan u bilaabmaan, si aad ah ayay muhiim u tahay in aanu ballaarinno adeegyadeeda si aan ugula kulano dadka halka ay joogaan; dadkeena dhallinyarada ah, ee dugsiga jooga,” ayay sheegtay. “Dugsiyada Dadweynaha Portland iyo Degaanka Multnomah waxay hadda iska kaashanayaan taageerida dhallinyarada ay la soo darsen dhibaatooyinka caafimaadka dhimirka iyo isticmaalka mukhaadaraadku. Aad ayaan ugu faraxsanahay in aan arko PPS oo sharaxaad ka bixinaysa qorshahan dhammeystiran si loo bixiyo ka hortag, waxka qabasho iyo daaweyn ku aadan ardayda.”

Qorshaha REAHL, oo ay hoggaamiyso Brenda Martinek, oo ah Maamulaha Adeegyada Taageerada Ardayda ee PPS, ayaa arkay natiijooyin hore. Tusaale, degmada ayaa shaqaaleysay Dad khibrad u leh Caafimaadka Dhimirka si ay ula shaqeeyaan xarumaha dadka lagu daaweeyo si loo xaqiijiyo isbedel toosan oo dib loogu soo laabanayo dugsiga, iyo in la bixiyo taageero kala duwan oo dheeraad oo la siiyo ardayda iyo qoysaska. Degmadu waxay sidoo kale kordhisay helitaanka adeegyada caafimaadka dhimirka oo loogu talagalay ardayda aan caymiska lahayn iyo kuwa caymiskoodu hooseeyo.

“Waxaan halkan u joognaa in aanu bilawdo daryeelka gaarka ah ee joogtada ah oo isku keenaya caawimaad iyo taageero laga helo hawl-galayaasheena bulshada oo kala duwan, macallimiinta iyo xirfadlahaasha, si fiiro gaar ah loo siiyo ardayda ay dhibaatooyinkooda isticmaalka mukhaadaraadka iyo caafimaadka dhimirku uu tahay qayb weyn oo noloshooda ka mid ah,” ayuu sheegay Kormeeraha Guud ee PPS Guadalupe Guerrero.

Fiiri [soo bandhigida fiidiyowga REAHL](#)

Fiiri [website-ka REAHL](#) wixii macluumaad dheeraad iyo ilo ah.